student housing fact sheet

Sidee baan ku helaa oo aan u dalbadaa guriga?

liisgareynta hoyga

waxaa jira tiro meelo ah oo aad ka raadsan karto hoy, inkastoo ay ku xiran tahay nooca hoyga ee aad raadineysid. Waxan soo socdaa waa tuse kaliya ee meeshaad ka heli kartid liiska (tusaale, xayeysiin) noocyo kala duwan oo guryo ah.

homestay

hoyga Homestay waxaa badanaa soo habeeya machadkaaga waxbarashada, si kastaba ha ahaatee waxaa jira tiro wakaalado madax bannaan oo ka shaqeeya adeega meelaynta. (waxaad ka heli kartaa wakaaladahan adoo ka raadinaya 'homestay Victoria' interneetka ama tusaha taleefanada white pages ka Dawlada & Ganacsiga *(White Pages Business & Government)*.

Hoyga kambaska jaamacada ku yaal

La xiriir adeega guriyeynta ardeyda ee machadkaaga ama ka jeegaree website kooda liiska. Ama ka eeg cinwaanka *tusaha taleefanka Dawlada & Ganacsiga White pages ka*.

Guryaha ardeyda

Xayeysiinta guryaha ardeyda waxaa badanaa laga helaa interneetka, tusaha taleefanka Dawlada & Ganacsiga White Pages iyo waraaqaha iyo weblinkyada laga helo machadkaaga.

Guryaha qol qolka loo kireyeeyo

Waxaad ka heli doontaa liiska guryaha qolqolka loo kireeyo wargeyska, looxa ogeysiisyada adeega ardeyda iyo website –yada iyo website yada hoyga la wadaago.

Kireysiga gaarka ah

Haddii aad qorsheynaysay inaad la sameysato guri la wadaago saaxiibo, ama aad adigu guri kireysato, waxaad ka heli kartaa guryaha gaarka ah ee kirada ah adoo:

> liisaska kirada – kuwan waxaa laga helayaa wakiilada guryaha

> interneetka – wakiilada guryaha liiskooda guryaha kirada ah ee websiteyadooda iyo qaar ka mid ah meelaha wax laga baadho raadi guryaha fiktooriya ('real estate Victoria')

> wargeysyada – eeg *The Age* iyo *The Herald Sun* Sabtida. Xasuuso inaad sidoo kale ka jeegareyso wargeysyada bulshada xaafada ee meelaha aad jeclaan lahayd inaad ku noolaatid

Guryaha la wadaago

Haddii aad dooneysid inaad soo degto guri la wadaago, waxaa jira dhawr meelood oo aad ka fiirin kartid ogeysiisyada qolka:

> looxda ogeysiiska bulshada – marmarka qaarkood laga helo dukaamada buuggta iyo kafateeriyada xaafada

> interneetka

> adeegyada guriyeynta ardeyda – waxay badanaa leeyihiin looxa ogeysiiska liisyada

> machadyada qaarkood waxay leeyihiin keydka macluumaadka hoyga- waa inaad ka diiwaangashan tahay machadkan si aad u gasho kuwan.

> wargeysyada – eeg *The Age* iyo *The Herald Sun* Sabtida. Xasuuso inaad sidoo kale ka jeegareyso wargeysyada bulshada xaafada ee meelaha aad jeclaan lahayd inaad ku noolaatid

Kormeerida guriga kirada ah ee gaarka ah

Markaad soo kormeerto guri, waxaa aad muhiim u ah inaad si dhammeystiran jeegareyso guriga labada gudaha iyo bannaanka. Waa inaad hubisaa inaad ku faraxsan tahay guriga ka hor intaadan waxba saxiixin ama wax lacag ah bixin.

➲ Ha iska maleynin inuu mulkiiluhu ama wakiilku uu iska sameynayo wixii dayactir ah ilaa aad si khaas ah u weydiisato inay sidaas sameeyaan. Wixii macluumaad dheeraad ah eeg warqada xaqiiqda ee Dayactirka ***(Repairs)***.

Isla markaad fiirfiiriso guriga, tijaabo batoonada nalka laga shido, kuwa hawada ama qiiqa qaada ama marawaxadaha sare, cunto kariyaha, qasabadaha iyo qubeyska (caddaadiska biyaha) iyo wixii kuleyliyayaal ah iyo/ama qaboojiyaha si aad hubiso inay shaqeynayaan. Weydii inuu taleefanku xiran yahay tijaabi xoogga waxyaalaha ku xiran guriga waxyaalaha birta ah biraha daaha si aad u hubisid inay ammaan iyo nabadgelyoba leeyihiin.

Sidoo kale, waa inaad hubisaa inaad xiri kartid furina kartid dhammaan daaqadaha iyo albaabada. Jeegaree nooca sakatuuro ee ku xiran, maadaama shirkado badan oo ceymis ayan ku siin doonaan ceymiska alaabta guriga ilaa daaqaduhu ay leeyihiin sakatuurooyin fure leh iyo inay albaaba bannaanku leeyihiin qufulo.

Eeg bogga kale...

TENANTS UNION of Victoria Ltd

Liiska kormeerka guriga ***(Property inspection checklist)*** (warqada xaqiiqda ee guriga ardeyda) waxay kuu sheegeysaa waxaad raadineyso markaad guriga kormeeraysid.

➲ Haddii qayb ka mid ah guriga ama waxyaalaha ku xiran ama ku dhegan ay waxyeelo qabaan amase aysan u shaqeynaynin si haboon, waa inaad weydiisaa mulkiiluhu inu dayactiro. Eeg warqada xaqiiqda Dayactirka ***(Repairs)*** ama kala xiriir Tenants Union wixii tallo ah.

Dalbashada guriga gaarka ah ee kirada ah

Ka dib markaad guriga soo kormeerto oo aad go'aansato inaad dooneysid inaad ku soo guurtid waxaad u baahan doontaa inaad buuxisid foomka codsiga ee uu bixiyo wakiilka gurigu (haddii mulkiiluhu uu isticmaalayo wakiil).

Waxaa lagu weydiin karaa su'aalo ku saabsan:

> dakhliga iyo faahfaahinta bangiga

> taariikhdii hore ee wax kireysigaaga

> taariikhda iyo faahfaahinta shaqadaada

> tixraacyada – waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo laba

Laguma weydiin karo su'aalaha ku saabsan:

> jinsiyadaada

> xaalladaada guur

> waxyeelo ama iinta

> nooca galmadiisa

> siyaasad ama diintuu rumeysan yahay

Debaajiga codsiga

Wakiilka ama mulkiiluhu waxaa laga yaabaa inay ku weydiiyaan debaajiga codsiga. Haddii ay tahay inaad bixiso debaaji, waa inaad hubisaa in lagu siiyo caddeyn. Debaajigaaga waa in laguu soo celiyaa.

Waa sharci daro wakiilada iyo mulkiilayaashu inay lacag ujra ah kaa qaadaan oo ku saabsan kuwan soo socda:

> kuu ogolaanshaha inaad guriga soo kormeerto

> siinta lagu siiyo furayaasha markaad guriga ku soo guurto

> mushqaayad ama lacag ujra ah oo ah guriga kaa kireyntiisa

> ku siintaada kaadhka kirada lagu bixiyo

> sameynta iyo isticmaalida tasiilaadka lacagta akownkaaga laga goosanayo

➲ Wixii macluumaad dheeraad ah eeg warqadaha xaqiiqda ee soo socda:

> maxay u taagan tahay waxa loo soo gaabiyey hay'adaha guryaha kireeya? ***What do the real estate abbreviations stand for?*** (warqada xaqiiqda ee guriyeynta ardeyda)

> maxaan u baahan nahay inaan ogaado markaan soo guurayo ***(What do I need to know when I'm moving in?)*** (warqada xaqiiqda ee guriyeynta ardeyda)

> bilaabida kireysiga ***(Starting a tenancy)*** (warqada xaqiiqda)

Wixii macluumaad dheeraad ah taleefan u dir Khadka Tallada Ururka Kireystayaasha (Tenants Union Advice Line) ☎ (03) 9416 2577.

fact sheet student housing

Macluumaadkan waa tuse ahaan oo kaliya waana inaan loo isticmaalin wax kuu bedela tallada sharciga ee aqoonta leh.

Tenants Union of Victoria Ltd ACN 081 348 227 **May 2010** www.tuv.org.au

TENANTS UNION of Victoria Ltd